# Kaarka wakhtiga firaaqada 2024

Kaarka wakhtiga firaaqada waxaa iska kaashanaya jilaayasha gaarka ah, degmada Sandefjord iyo NAV. Nidaamku waxa uu hubin doonaa in carruurta iyo dhalinyarada ka soo jeeda qoysaska dhaqaalahoodu liito ay helaan fursado wanaagsan oo ay kaga qayb qaataan hawlaha dhaqanka iyo madadaalada.

## Kaarka wakhtiga firaaqada iyo ka dhigistiisa hab dhijitaal ah

Kadib go'aan siyaasadeed kiis 065/21 ee noofambar 2021, xal dhijitaal ah ayaa hadda loo sameeyay kaarka wakhtiga firaaqada. Isla kiiskii, go'aan ayaa sidoo kale la gaaray in wixii hore loogu yeeri jiray kaarka waayo-aragnimada hadda loogu yeero kaarka madadaalada ama wakhtiga firaaqada. Laga bilaabo janaayo 2023, kaarka wakhtiga firaaqada waa dhijitaal.

## Kooxda bartilmaameedka ah

Kaarka wakhtiga firaaqada waxaa la siin karaa carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxaysoo 2-18 sano ee qoysaska dhaqaalahoodu liito. Sannadka 2024, degmada Sandefjord waxay haysata 600 oo kaar oo la qaybiyo, hal kar ayaa la siin doona carruurta iyo dhalinyarada. Waxa la qiimeeyaa inta kaar ee qoyska helayo, laakin qoysaska dhawr carruur haysta waxa la siin karaa dhawr kaar.

## Sidee loo codsadaa?

Codsiga kaarka wakhtiga firaaqada waa in loo gudbiyaa NAV. Foom codsi fudud ayaa laga heli karaa hoos. Foomkan waa in la daabaca, la buuxiyaa oo la keena xafiiska NAV oo ay la socdaan dukumentiyo. Codsiyada la soo gudbiyay iyada oo aan dukumenti la socon, lagama soo jawaabi doono. (dukumentiyada laga rabo waa dakhliga iyo kharashyadaada).
Ciwaanka booqashada ee NAV Sandefjord waa: Søeberggate 3, 3211 Sandefjord.
Foomka codsiga kaarka wakhtiga firaaqada 2024 (PDF, 247 kB)

## Shuruudaha kaarka

Marka laga soo tago xaaladaha dhaqaale keliya, waxay noqon doontaa mid ku habboon in la tixgeliyo arrimo kala duwan oo bulsheed sidaas darteed abaal-marintu waxay noqon doontaa isku-dhafka dhaqaale iyo bulsho. Waa NAV kuwa hela codsiyada oo qoondeeya kaararka wakhtiga firaaqada iyagoo la tashanaya kalkaaliyayaasha caafimaadka, dugsiyada, xanaanada iyo hay'adda carruurta.
Kaarka waxaa uu socdaa markiba hal sano.

## Markaad hesho kaarka wakhtiga firaaqada:

Marka lagu qoondeeyo kaarka wakhtiga firaaqada, waa in aad ka samaysato profile/bog sandefjord.friskus.com. Halkan waxaad ka heli doonta tigidhada, soo jeedinta iyo bixinta kharashka xubinimada iyo wixii la mid ah. Waxay qaadan kartaa ilaa 7 maalmood oo shaqo, laga bilaabo wakhtiga kaarka laguu qoondeeyay, ilaa uu kaarku shaqaynayo.

**Waxaan sameynay hage sawireed ku saabsan sida loo bilaabo kaarka wakhtiga firaaqada iyo Friskus.**
Sida loo sameeyo profile/bog oo loo hawlgeliyo kaarka wakhtiga firaaqada (PDF, 5 MB)

Sida loo bixiyo qaansheegyada xubinimada oo loo codsado lacagta qalabka/hawlaha kale (PDF, 3 MB)
Sida loo isticmaalo tigidhada bilaashka ah (PDF, 4 MB)

Ma waxaad doonaysaa maalgelinta qalab ama hawl? Waxaad ku soo gudbin kartaa codsi foomkayaga. Foomka codsiga lacagta qalabka iyo dhaqdhaqaaqa
Waxaan haysanaa waqtiyo go'aan oo aad iman karto oo aad heli karto caawimo ah dejinta akoonkaaga ama isticmaalka guud ee kaarka wakhtiga firaaqada.

Wakhtiyada la cusboonaysiiyay ee caawinta friskus (Linkii jadwalka wakhtiyada)

Su'aalo ma qabtaa ama ma u baahan tahay in lagaa caawiyo kaarka wakhtiga firaaqada? U dir iimayl fritidskort@sandefjord.kommune.no

## Nuxurka

Kaarka wakhtiga firaaqada waxaa ku jira lacag loogu talagalay waxqabadyada firaaqada iyo tigidhada bilaashaka ah ee kala duwan. Waxa ku jira wax yar way kala duwanaan karaan sanadba sanadka ka dambeeya waxaana lagu habeeyaa kooxaha da'aha kala duwan. Waxaa jiri doona macluumaad la cusboonaysiiyay oo ku saabsan waxa la heli karo ee kaarkaaga ku jira, ka fiirso gudaha profilkaaga ee Friskus.

**Nuxurka 2024:**
Tigidhada bilaashka ah ee booqashada shineemada ee xarunta dhaqanka Hjertnes.
Tigidhada bilaashka ah ee bandhigyada dhaqameed iyo waxqabadyada kala duwan ee degmada.
Tigidhada bilaashka ah ee hoolka dabaasha ee Sandefjord.

**Intaa waxaa dheer oo kaarka dabooli karaa:**
Xubinimada iyo kharashka tababarka ee ururka/xarunta jimicsiga.
Ka qaybgalka koobabka iyo xafladaha kale ee ururka soo qabanqaabiyo.
Qalabka si gaar ah loogu talagalay hawsha/xubinta.

## Kooxaha, ururada iyo bixyayaasha kale

Kooxaha iyo ururada hela deeqda dawladda hoose waxay ku hawlan yihiin inay ku aqbaalan kaarka wakhtiga firaaqada. kuwa kale ee raba inay ka qaybqaataan nidaamka iyaaga qeexaya sida aay rabaan. Waxaad kooxdaada ama ururkaaga ka

diiwangelinaysaa Sandefjord Friskus.
Bogga internetka sandefjord.friskus.com

## Xil qarinta iyo qarsoodiga

Isticmaalka kaarka wakhtiga firaaqada waxa uu u baahan yahay in la ilaaliyo aqoonsiga qofka kaarka sita, halka aanay degmadu doonayn in ay dhisto nidaam aad u xafiiseed oo ay adag tahay in la maamulo. NAV kaliya ayaa leh dulmar guud ee isticmaalayaasha. Waxaa loo malaynayaa in kooxaha iyo ururada, shaqaalaha tigidhada iyo kuwa kale ee daruuri u ah inay la xiriiraan isticmaalayaasha, ula dhaqmaan iyaga iyo kaarka iyagoo tixgelin iyo qaddarin leh. Marka isticmaalayaashu ay isticmaalaan kaarka si ay isu qoraan xubinimada kooxaha iyo ururada, tani way inay u dhacdaa sida xaaladaha caadiga ah, laakin waa in inta ugu yar ee suurtogalka, sida tusaale ahaan, maamulaha iyo/ama khasnajigu ogyahay in xubintu tahay qofka haysta kaarka wakhtiga firaaqada.

## Maamulka nidaamka

Waa NAV kuwa haysata dulmar iyo aqoonta dadka hadda qaata kaarka. Dhammaan codsiyada waxaa qiimeeya NAV.
Ciiwaanka booqashada NAV Sandefjord waa: Søeberggate 3, 3211 Sandefjord.
Waa qaybta dhaqanka ee degmada Sandefjord kuwa gacanta ku haysa shaqada kaarka wakhtiga firaaqada, waxayna mas’uul ka tahay dabagalka waxa ku jira kaarka waqtiga firaaqada. Kaarka waqtiga firaaqada waxaa inta badan lagu isticmaalaya goobta sandefjord.friskus.com si loola xiriira isticmaalayaasha/ururada wadaaga macluumaadka la cusboonaysiiyay, isticmaalka tigidhada bilashaka ah iyo kabida khidmadaha/hawlaha xubinimada.